

## Meesha ka saarista caqabadaha hortaagan shaqada dumarka soogalootida ah

Maarso 08, 2023

Dowladaha Alberta iyo Canada waxay kordhinayaan sidii dumarka soogalootida ah u heli lahaayeen shaqooyinka qaybta daryeelka caruurta gobolka ee shatiga loo qaato.

Helitaanka daryeelka caruurta oo ah mid ammaan ah, tayo wanaagsan waxay muhiim u tahay xaqijinta sidii waalidiinta Alberta ay ugu soo noqon lahaayeen shaqada ayna kor ugu qaadi lahaayeen koboca dhaqaalaha gobolka. Ayada oo lagu dadaalayo abuurista boosas shaqo oo gaaraya 68,700 kuwaas oo ah daryeelka caruurta ee shatiga loo qaato ugu danbayn 2026, ilaa 9,000 oo ah bareyaasha waxbarashada caruurta ayaa si buuxda loogu baahan doonaa si boosaskaasi bannaan loo buuxiyo.

Dowladda Alberta waxay dowladda federaalka ah ka kaashanaysaa sidii loogu maalgalin lahaa in ka badan \$1.4 milyan bilowga mashruuca Calgary Immigrant Women's Association si dumarka soogalootida ah looga caawiyo bilaabidda iyo kobcinta xirfadaha si ay u noqdaan bareyaasha caruurta oo shahaado haysta. Mashruuca bilowga ah waxaa loogu tala galay sidii meesha looga saari lahaa caqabadaha loona hormarin lahaa helitaanka iyo dhammaysashada waxbarashada dugsiga sare ka danbaysa ee caruurta yaryar iyo tababarada kale ee shaqaalaysiinta ka horreeya ee muhiimka ah.

Markii loo tababaro dumar ka kasoo jeeda bulshooyin iyo isirro kala duwan waxbarashada caruurta xiliga hore, mashruucani wuxuu sidoo kale kordhin doonaa dookha waalidka ee xulashooyinka daryeelka caruurta kuwaas oo buuxinaya baahiyaha caruurtooda ee dhaqan ahaan, luuqad ahaan iyo waxbarasho ahaanba.

Mashruuca bilowga ah wuxuu kaashanayaa Bow Valley College, kaasoo bixin doona tababarka macallimiinta waxbarashada caruurta ee heerka 1aad iyo heerka 2aad kuna bixinaya saddex hab oo onleen ah ayada oo ay ku xiran tahay luuqadda ardayga iyo heerkiisa wax akhriska.

Waxaa loogu tala galay in uu gacan ka gaysto in caqabadaha suuqa shaqo ee dumarka soogalootida ah laga saaro meesha, ayada oo la galinayo xirafado xoojinaya dhaqaalaha iyo qaybta daryeelka caruurta shatiga loo qaato ee Alberta.

Tababarka waxaa la siin doonaa ku dhawaad 230 dumar oo soogalooti ah waxaana lagu buuxin doonaa qaab onleen ah si ardaydu u helaan tababaro diyaarsan oo lagu jaangooyay baahiyahooda gaarka ah. Mashruuca bilowga ah wuxuu sidoo kale gacan ka gaysan doonaa adeegyada shaqo gaynta macaamiisha.

### Macluumaadka la xiriira

#### Warbaahinta kala duwan

[Dhagayso war saxaafadeedyada](#)

[Daawo warar saxaafadeedyada](#)

#### Weydiimaha saxaafadeed

Chinenye Anokwuru

Chinenye.Anokwuru@gov.ab.ca)

780-720-1915

Xoghayaha Sare ee Warfaafinta,

Adeegyada Caruurta

Ayada oo lagu maalgaliyay Alberta-Canada Canada-wide Early Learning and Child Care (ACELCC) Agreement, mashruuca bilowga ah waa mid kamid ah tallaabooyin fara badan oo la sii wadi doono si loo kordhiyo helitaanka iyo ka taageeridda dhammaystirashada barnaamijyada waxbarashada caruurta xiliga hore ee dugsigga sare ka danbaysa, wuxuuna gacan ka gaysan doonaa soo jiidashada, tababarka, haynta, iyo shahaado siinta bareyaasha waxbarashada caruurta xiliga hore si uu gacan uga gaysto horumarka hannaanka daryeelka caruurta ee Alberta.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Ayada oo qayb ka ah \$3.8 bilyan Alberta-Canada Early Learning and Child Care (ACELCC) Agreement, qiyaastii \$300 milyan oo muddo shan sanno ah ayaa loo qoondeeyay si loo taageero dadka ka shaqeeya daryeelka caruurta sidii ay u shaqaalaysiin lahaayeen bareyaal waxbarashada caruurta oo dheeraad ah sidoo kalena usii haysan lahaayeen kuwa horey uga sii shaqaynayay gobolka oo dhan.
- Ayada oo qayb ka ah Canada-wide agreement, Alberta waxaa ka go'an xaqiijinta in daryeelka caruurta ee Alberta uu ahaado mid ka tarjumaya bulshooyinka kala duwan iyo baahiyaha gaarka ah ee gobolkeenna.
  - Deeqda ah \$1.4 milyan ah waxaa lagu maalgalin doonaa tiirka dhammaan ka qayb ahaanshaha ee Alberta-Canada Canada-wide Early Learning and Child Care agreement.
- Si ay uga caawiso soo jiidashada iyo haysashada shaqaalaha shatiga u haysta boosaska shaqooyinka daryeelka caruurta, dowladda Alberta waxay:
  - Kordhisay awoodda diiwaangalinta ee heerka 1aad ee bilaashka ah ee koorsada wacyigalinta daryeelka caruurta ayada oo ka kordhinaysa 4,000 oo jago gaarsiinaysana 10,000 oo jago.
  - Waxay ku kordhinaysaa mushaharka ilaa \$2, taas oo ku xiran heerka shahaadada (\$0.50 heerka 1aad, \$1 heerka 2aad, iyo \$2 heerka 3aad).

Alberta waxay haysaa dhabbihii ay ku hiigsanaysay ballanqaadkeedii Alberta-Canada Canada-Wide Early Learning and Child Care Agreement si loo yareeyo kharashka daryeelka caruurta ee shatiga loo qaato celcelis gaaraya \$10 maalinkii marka la gaaro 2026.